

Sheeko xariiirtu waa aasaaska waxbarashada carruurta Soomaaliyeed

Mukulaal iyo Doolli

Bisad iyo Jiir

Casharka Barashada afsoomaliga



Bari baa waxaa wada safray Bisad iyo jiir (Dooli) Waxay ku heshiyeen in ay iska sii weheshadaan jidka intay ku jiraan. Intii jidka la sii socday aaya Bisadii hadba miliqsataa oo miciyahana isku listaa, had iyo jeerna eegtaa xaga jiirka inta indhaha galka ka soo saarto. Jiirkii intuu ka yaabey bisadii iyo sifaalaheedii ayuu u yeedhay, markaas ayuu ku yidhi, “Bisadeey indhaha aan arkayo safar kuma wada geli karro, ee midkeenba dhinac ha u safro.” Markaas ayey Bisaddii tiri, “Maxaa

dhacay oo aad igu qoonsatay?" Anigu markaan arko jiir ayaan hamaahsadaa (halaaqood) inta farxadu iga badato jiirkii intuu geedo dhexdood ka dusey ayuu yidhi, "Isma raaci karno, wehelna kaama dhiganayo ee waxaad weheshato raadso." Halkaas ayeey jiirkii iyo mukulaashii xiriirkooda ku dhamaadey . Wixii faahfaahin kala xiriir webmasterka